
# FAAYRUSKA BUROOYINKA KEENA (HPV)

**(HUMAN PAPILLOMA VIRUS** (HPV))



**HPV waa infakshan aad u faafa oo aad ayuu ugu badan yahay Mareykanka. Waxa lagu kala qaadaa taabasho ah maqaar-ilaa-maqaar. Qof kasta ayaa mar ay noqotaba noloshiisa waxaa lagu qaadsiiyaa ugu yaraan hal nooc oo ah HPV. Noocyada qaarkood waxay sababi karaan dhibaatooyin caafimaad, laakiin waxaa jira tallaallo lagu joojin karo in badan oo ka mid ah dhibaatooyinka.**

## Sidee buu faayruskan u faafaa?

- Waxaa HPV lagu kala qaadi karaa taabasho ah maqaar-ilaa-maqaar ee qofka qaba faayraska HPV, xataa haddii aan la isku arkin wax ah calaamado ama astaamo.
- Maaddaama uu HPV aad u badan yahay, si fudud ayaa la isku qaadsiin karaa iyadoo aan la ogeyn.

## Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha faayuskan?

- Inta badan dadka la qaadsiiyo HPV ma laha calaamado ama astaamo. Badanaaba, HPV waa uu isaga baxaa jirka isaga oo aan reebin wax ah dhibaato caafimaad.
- Noocyada HPV qaarkood waxay keeni karaan burooyin lagu arko xubinta taranka. Burooyinkaasi waa kuwo yaryar ama wax kuuskuusan oo ka soo baxa xubinta taranka. Waxay noqon karaan wax yar ama weyn, ballaaran ama fidsan, ama wax saameeya meel weyn.

## Miyuu HPV dadka ku noqdaa kansar?

- Mararka qaarkood HPV waxa uu kansar ku keeni karaa afka ilmagaleenka iyo noocyo kale oo ah kansar, sida kansarka dhinacyada xubinta taranka haweenka, gudaha hoose, xubinta taranka ragga, futada, ama cunaha gudihiisa dambe ee carrabka iyo qumanka.
- Ma jirto hab loo sii ogaan karo haddii uu infakshanku isu beddeli doono dhibaato caafimaad oo daran, sida kansar.

## Waa maxay fursadaha daaweynta?

- Ma jirto wax daaweyn ah oo loo hayo faayruska noocan ah. Hase ahaatee, waxaa jirta daawo lagula tacaali karo dhibaatooyinka caafimaadka ee HPV.
- Daaweynta kansarka uu keeno HPV waxaa ka mid ah qalliin, shucaac, iyo/ama daaweyn ah kiimikooyin. Kansarka ilmagaleenka afkiisa waa mid la daaweyn karo. Burooyinka xubinta taranka waxaa wax ka qaban kara dhakhtarka ama daawo ayaa loo qaataa.

## Sidee baa looga hortagi karaa?

- Tallaal in loo qaato ayaa ah difaaca ugu fiican ee HPV. Laba jeer oo ah tallaal ayaa lagula talinayaa wiilasha iyo gabdhaha gaaray 11 jir ilaa 14 jir (talaalkaas waxaa la bilaabi karaa marka ay ilmuhu gaaraan 9 jir). Dadka da'doodu u dhaxayso 15 jir ilaa 26 jir waa in ay qaataan saddex tallaal haddii aysan yaraantoodii soo qaadan tallaalka HPV.
- Baarista dheecaanka ilmagaleenka oo la joogteeyo ayaa ah habka ugu fiican ee lagu garto dhibaatooyinka ka hor inta aan la arkin kansarka ilmagaleenka.
- **Waa in aad dhakhtarka kala hadasho tallaalka ay ilmuhu u qaadan karaan wixii kansar ah oo HPV ku keeni karo.**

**BUREAU OF COMMUNICABLE DISEASES**
P-01756SO (12/2022)
Wisconsin Department of Health Services | Division of Public Health
https://www.dhs.wi.gov/immunization/hpv.htm | DHSDPHBCD@dhs.wi.gov